



I, \_\_\_\_\_  
Magaca koowaad ee bukaanka iyo magaca dambe

halkan waxaan oggolaansho siinayaa shaqaalaha \_\_\_\_\_  
ka shaqeynaya xogtayda gaarka ah ee u jeeddadiisu tahay la-talinta (Qod. 4 No. 2 GDPR),  
sida ku xusan Qaybta 2 ee qoraalada habaynta xogta. Xogtan si ikhtiyaari ah ayaan u  
siiyay qofka la-talinta bixinaya ama waxa aan ka helay qareenkayga, kaas oo aan horay  
awood ugu siiyay aniga, ama machad ama qalliin dhakhtar oo ii soo gudbiyay. Ururinta  
xogta shakhsi ahaaneed waxa kaliya oo loogu talagalay la-talinta baahiyaha ilaalinta gaar-  
ka ah oo aan marnaba la samayn sabab la'aan. Shaqaalaha \_\_\_\_\_  
waxaa saaran waajib qarsoonaanta sirta ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan tixraac macluumaadka ilaalinta xogta ee  
ku lifaaqan.

Waxaa si weyn la iigu wargeliyay wax ku saabsan shuruudaha sharciga iyo xuquuqaha la  
xidhiidha ilaalinta xogta.

Goobta

Taariikhda, Saxiixa

Waad ka noqon kartaa ama bedeli kartaa odhaahda dardaaranka wakhti kasta.  
Xaaladdan oo kale, fadlan qoraal nagu soo ogeysii.

# Qoraalada habaynta xogta (loogu talagalay bukaanada) sida uu qabo Qodobka. 13,14 GDPR

---

Bukaanka qaaliga ahow,

Wajibka sirta iyo qarsoodiga xogta ayaa aad muhiim ugu ah la-talintayada. Waxaan u baahanahay xoogaa xog shakhsi ahaaneed si aan u fulino la-talintaada. Waxaan u maamulaynaa waxa loogu yeero xogtaada shakhsi ahaaneed si mas'uuliyad gaar ah leh. Marka loo eego Xeerka Ilaalinta Xogta Guud ee Midowga Yurub, waxaa waa-jib nagu ah inaan ku ogeysiino ujeedada xog ururinta, kaydinta iyo gudbinta xogtaada. Xuquuqdaada waxaa ka mid ah helitaanka habaynta (Qodobka. 15 GDPR), sixitaanka xogta khalidan (Qodobka. 16 GDPR), tirtirida xogta aan loo baahnayn habaynta (Qo-dobka. 17 GDPR), xaddidaadda habaynta (Qodobka. 18 GDPR) iyo diidmada habaynta (Qod0bka. 21 GDPR).



## Xog habeeyaha

Magaca:

---

Ciwaanka:

---

Xogta xdhiidhka:

---



## Ujeedada xog ururinta iyo habaynta

Bilawga iyo inta lagu guda jiro la-talinta baahiyaha ilaalinta gaarka ah, waxaanu ururinaynaa xog kala duwan oo adiga iyo caafimaadkaaga ku saabsan. Tani waxay lama huraan u tahay si loo bixiyo la-talin buuxinaysa heerka. Ururinta xogta shakhsi ahaaneed waxay kaliya u adeegtaa ujeedada la-talinta iyo taageerada hirgelinta baahiyaha gaarka ah marnaba looma sameeyo sabab la'aan. Dabcan, xogtaas oo keliya ayaa la ururiyaa ee lagama maarmaanka u ah la-talinta. Xeerarka ilaalinta xogta waa la ilaaliyaa.

Waxaan jeclaan lahayn inaan kaa codsano oggolaanshahaaga si aan u ururino oo iskugu geyno xogta shakhsiyeed ee soo socota:

- Magacaaga, magacaaga koowaad, taariikhda/meesha dhalashadaada iyo wadankaaga dhalashadaada
- Cinwaanka guriga, lambarka taleefoonka
- Xaaladdaada deganaanshaha, lambarka faylka iyo aqoonsiyada kale ee kala soocidda rasmiga ah
- Sida aan kuula soo xiriiri karno (aqoontaada luuqada)
- Dukumeentiyaada, oo ay ku jiraan dukumeentiyo la iskaan gareeyay (tusaale, waraaqaha aqoonsiga, ogeysiisyada maamulka) kuwaas oo aad noo siinayso ujeedada la-talinta iyo la xidhiidhkaada dhinacyo saddexaad (mas'uuliyiinta, ururada samafalka, qareenada) ilaa xadka looga baahan yahay arrintan. The data to be collected also includes therapy reports, medical certificates, doc-

tor's letters and protocols that we prepare ourselves or that other psychotherapists/doctors make available to us.

- Xogta la ururinayo waxa kale oo ka mid ah warbixinnada daawaynta, shaahaadooyinka caafimaadka, waraaqaha dhakhtarka iyo hab-maamuuska aan nafteena u diyaarino ama ay dhakhaatiirta cilminafsiiga/dhakhaatiirta kale na siiyaan.



### **Helayaasha xogta**

La-taliyayaasha iyo dhakhaatiirta maskaxda waxa ay tahay inay fuliyaan waajibaadka qarsoonaanta sirta. Waxa kaliya oo aanu u gudbinaa xogtaada qoto-saddexaad haddii tani uu sharcigu ogolaado oo aad si cad u ogolaatay waree jinta (ka sii daynta sirta).



### **Kaydinta xogta**

Waxa kaliya oo aanu hayni doonaa xogtaada khaaska ah ilaa inta looga baahan yahay hirgelinta daawaynta iyo la-talinta. Dhammaan xogta shakhsi ahaaneed iyo dukumeentiyadu waxaa loo haynayaa, iyadoo la raacayo shuruudaha sharciga, muddo... sano ka dib ballantaadii ugu dambaysay. Xogtaada waxaa ilaalinaya habab farsamo iyo hab urureed oo ku habboon



### **Xuquuqdaada**

Mabda 'ahaan, waxaad ka noqon kartaa siidayntan waajibaadka sirta wakhti kasta. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaadka ku saabsan xogtaada gaarka ah ee kaydsan wakhti kasta. Haddii aad aragto wax khaldan, waxaad isla markaaba codsan kartaa sixitaanka ama tirtirka xogta khaldan.

Waxaad xaq u leedahay inaad uga dacwooto maamulka ilaalinta xogta ee awooda u leh haddii aad u aragto in habaynta xogtaada shakhsi ahaaneed ay tahay sharci darro.

Ciwaanka maamulka kormeerka ee masuulka nooga ah waa:

Magaca:

---

Ciwaanka:

---

---

